

REF/SJS/MOG/0023/11/2019

KU: Guddiga Warfaafinta iyo Arrimaha Bulshada, Aqalka Sare, BFS  
OG: Guddiga Warfaafinta ee Golaha Shacabka, BFS  
OG: Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska, XFS

Date: 19 Nofembar, 2019

Page | 1

## **UJEEEDO: TALO SOO JEEDIN SHARCIYEED XEERKA SAXAAFADDA SOOMAALIYA**

Mudane Guddoomiye, Salaanta Islaamka kaddib,

- [Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed](#) (Somali Journalists Syndicate -SJS) oo ah urur waddani ah oo ay ku mideysan yihiin suxufiyiinta ka shaqeeya warbaahinta gudaha iyo dibadda, ahna urur difaaca danaha suxufiyiinta xubnaha ka ah, waxaa sharaf ah in uu halkan idinkugu soo gudbiyo talo soo jeedin sharciyeed oo la xiriirta Sharciga Saxaafadda ee haatan horyaala Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federalka Soomaaliyeed.
- Sidaa la socoto, **Xeerka Saxaafadda** (*wax ka beddelka*) ee hadda horyaalla mudanayaasha Aqalka Sare wuxuu soo maray marxalado kala duwan, iyadoo markastana fursad ku filan oo ay kutalo-dhiibtaan aan la siin suxufiyiinta Soomaaliyeed.
- Waxaan aaminsanahay Xeer Saxaafadeed oo fiican inuu dan u yahay Saxaafadda guud ahaan, hase yeeshee Xeerka hadda idin horyaalla waxaa ku jira qodobbo aan ka qabno cabasho, anagoo u gudbinay Wasaaradda Warfaafinta ee Dalka. Hase yeeshee maadaama uu Xeerkaa uu hadda idinka idin horyaalla waxaan u aragnaa fursad wanaagsan oo aan talooyinkeenna ku dhiiban karno.
- Waxaan rajeyneynaa in aad tixgelin doontaan talo-soojeedinta sharciyeed – oo ku saleysan talooyin laga ururiyey suxufiyiinta- oo aan aaminsanahay in haddii la tixgeliyo uu sharcigani noqon doono mid difaaca danaha dalka, kan suxufiga iyo kan xorriyadda saxaafadda si waafaqsan dastuurka Federalka Soomaaliya.
- Sidaa darteed [Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed](#), (Somali Journalists Syndicate -SJS) wuxuu halkaan kuugu soo gudbinayaa qoraal ay ku cad yihiin qodobbada halista ku ah madax-bannaanida saxaafadda iyo shaqada suxufiyiinta Soomaaliyeed ee aan ka walaacsanahay ee ku jira Xeerkan.

Qodobbada iyo faqrada ay ku jiraan oo ay la socdaan talo soo jeedinteenna waa sida hoos ku qoran:-

*Wada shaqeyn wacan,*

**Abdalle Ahmed Mumin**

Xoghayaha Guud, Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (Somali Journalists Syndicate -SJS)

T: (cell) +252 612 448 044

E:



### QODOBKA 2AAD: Mabaadii'da Guud:

Faqraddiisa (2) oo qeexaysa in sababaha lagu xiri karo wariye iyo hay'ad warbaahin isagoo u dhigan sidan *"Xeerkani wuxuu dammaabad-qaadayaa in wariye iyo hay'ad Warbaahineed aan la xiri karin, lana xanibi karin shaqadeeda haddii ayan fal dembiyeed gacanta kula jirin"*.

**Soo jeedin:** Faqraddan waxay si cad uga hor imaanaysaa **Faqradda 7aad** ee isla Qodobkan oo sheegeysa "in go'aan Maxkamadeed oo kaliya lagu xanibi karo warbaahin ama lagu xiri karo wariye". Sidaas darteed waxaan soo jeedineynaa in gebi-aahan Faqraddan laga saaro Xeerka.

### QODOBKA 3AAD: Xorriyadda Saxaafadda:

Faqradda (3.4) oo u dhigan *"Waxaa reebban in warfaafinta madaxa bannaan lagu khasbo iney faafiyaan warar ka hor imaanaya maslaxadda dalka, nabadgalyada, dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada ama u daneynaya cid gaar ah."*

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in la qeexo qodobkan. Waxaanse ku talineynaa in laga saaro "maslaxadda dalka, nabadgalyada, dhaqaalaha, siyaasadda iyo bulshada"

### QODOBKA 4AAD: Arrimaha ka reebban warbaahinta xorta ah:

Faqradda (4.1): *"Waxaa ka reebban warbaahinta xorta ah ee madaxa bannaan ha noqoto mid gaar ah ama mid dowladeed arrimaha soo socda: (B) Arrimaha ku xusan qodobka 3aad faqraddiisa 3aad ee xeerkani; (T) Baahin warar been-abuur ah; (J) Hurinta colaadda ama dhiirri-gelinta qabyaaladda; iyo (X) Dacaayad aan sal lahayn oo loola jeedo shakhsi ama hay'ad, baahin warar nacayb iyo xag-jirnimo ku salaysan."*

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in qodobkaan laga saaro Xeerka, laguna beddelo mid qeexaya madax-bannaanida warbaahinta sida ku xusan Qodobada 18aad iyo 32aad ee Dastuurka.

### QODOBKA 5AAD: Ku Xadgudubka Xeerka Warbaahinta:

Faqraddiisa (T) waxay sheegeysaa in *"Ganaax lacageed oo qiimeheeda Xeer nidaamin gaar ah lagu soo saari doono kaasoo lagu ganaaxayo Wariyaha, tifaftiraha ama masuulka xarunta warbaahinta ee jebiya sharciga ama anshaxa warbaahinta"*

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga daayo ganaax lacageed, oo aanu aaminsanahay in sinnaba aan baahi loogu qabin in waqtigan. Waxaan aaminsanahay in **Xeer sidiisaba loogu talagalay wax-toosin ee aanay ahayn in wax lagu ciqaabo**. Sidoo kale waxaan caddeyn waxyaabaha lagu jebin karo Xeerka Saxaafadda. Ganaaxu wuxuu hor istaagi doonaa in saxaafadda madaxa-bannaan ay ku kacdo war-tebin xor ah oo ay ku jirto baaritaannada muhiimka ah.

**Faqradda (X):** ee isla Qodobkan oo sheegeysa in “*Haddii suxufiga, tifaf-tiraha ama mas’uulka warbaahineed ay ku kacaan falalka ku xusan qodobka 3aad ee xeerkan waxaa loo gudbinayaa xeer-ilaalinta qaranka oo horgeynaysa maxkamadaha awoodda u leh.*”

**Soo jeedin:** Saxaafaddu ma’ahan dembi, sidaa darteed waxaan soo jeedineynaa in faqraddan laga saaro Xeerka.

### **QODOBKA 9AAD (B): NIDAAMKA SHATIYADA LAGU BIXIYO:**

Faqradda (B) oo sheegeysa “*Waa inay jirto baahi loo qabo warbaahintan, waafaqsan tahayna qorshaha qaranka.*”

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga daayo shuruuddan ah “**in baahi loo qabo**” oo aan u aragno inay hor istaageyso furitaanka hay’ado warbaahineed oo cusub. Sidoo kale waxaan caddeyn waxa loola jeedo “qorshaha qaranka”.

**Faqradda (X)** oo sheegeysa in “*Warbaahin kasta sida Idaacad, Telefishin, Wargeys, Madbacad, Shenemooyin, Dugsiyada tababarka saxaafadda, Shirkadaha xayeysiinta , website-yada iwm (ha ahaadeen qaar hadda shaqeeya ama kuwa cusub oo la furayo) waa inay dhigaan lacag dabaaji ah oo qiimaheedu lagu soo saari doonno Xeer nidaamin gaar ah.*”

**Soo jeedin #1:** Waxaan soo jeedineynaa in laga saaro shuruuddan ah lacagta dabaajiga ah ee lagu xiraayo furitaanka xarumaha warbaahinta, taasoo ka dhigan hor istaagidda horumarka iyo koboca warbaahinta gaarka ah ee dalka. Waxay kaloo keeni kartaa in lagu bartil-maameedsado warbaahinta qaarkeed.

**Soo jeedin #2:** Waxaan kaloo soo jeedineynaa in website-yada iyo internetka aanay la mid ahayn warbaahinta kale, waana in marka ay xor ka yihiin nooc kasta oo xadidaad ah.

### **QODOBKA 11AAD (J): Shuruudaha Shatiga:**

Faqradda (J) waxay sheegeysaa in shuruudaha shatiga lagu codsanayo ay ka mid tahay “*Dhaqaalaha ku baxaya iyo cidda bixinaysa iyo hadafka laga leeyahay in lagu gaaro; iyo...*”

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga saaro Faqraddan Xeerka.

### **QODOBKA 13AAD: Xilliga Kala Guurka:**

Faqradda (13.1) waxay sheegeysaa “*kaddib dhaqan galka sharcigan warbaahintii hore ugu shaqeyneysay ruqsadda ku-meel-gaarka ah waxay soo codsanayaan Ruqsad rasmi ah mudo 60 cisho gudahood ah waxaana la waafajinayaa xeerkan*”

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga daayo shuruuddan warbaahintii hore u shaqeyneysay oo aan aaminsanahay in sifo sharci ah ay hadda kaga hawlgalaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyadoo muddadii Ku-Meel-Gaarka ahayd-na laga soo gudbay sannadkii 2012 sidaa darteed-na dhammaana Hay'adaha Dowladda Soomaaliya Shatiyada ay hadda bixiyaan ay noqonayaan kuwo "rasmi ah".

**Soo jeedin: Faqradda 13.2** oo sheegeysa "*Haday buuxiyaan shuruudaha ku xusan Qodobka 11aad farqadiisa 1aad, Warbaahinta shaqeyneysay Xeerka ka hor waxaa loo ilaalinayaa magaca iyo frequency*". Waxaan soo jeedineynaa in dhammaan warbaahinta horey u diiwaan-gashan Xeerka ka hor (oo aan aaminsannahay inay sifo sharci haddaba Dalka kaga shaqeeyaan) ay heshaa xuquuq ah in loo ilaaliyo magaca iyo mowjadda (frequency) loogu diiwaan-geliyey sifo sharci ah.

#### **QODOBKA 14AAD: GOLAHA WARBAAHINTA SOOMAALIYEED:**

Faqradda (J) oo sheegeysa in "*Ururada Bulshada Rayidka*" ay ku yeelanayaan saddex (3) xubnood Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed.

**Soo jeedin #1:** Waxaan shaki ka qabnaa kuwa ay noqon karaan (ama Dowladdu u aqoonsan tahay) Ururada Bulshada Rayidka ee ka mid noqonaya Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed, sidaa darteed waxaan soo jeedineynaa: (1) in la isla qeexo nooca bulshada rayidka ee ka madax-bannaan Dowladda (2) in laga yareeyo tirada saddexda (3) ah maadaama hawsha la qabanayo ay tahay mid Warbaahin, aana loo baahneyn ka mid ahaanshaha ururo bulsho oo tiro badan ee Golahan, isla markaana uu ku lumayo kaalinta garnaqsi ee ay Warbaahinta Madaxa-Bannaan iyo Saxafaiyiinta ku yeelan karaan Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed.

**Soo jeedin #2: Faqradda (14.5):** oo sheegaya in "*Magacaabidda Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed wuxuu ku ansaxayaa Go'aan Golaha Wasiirada....*". Waxaan soo jeedineynaa in Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed uu noqdo noqdo mid ka madax-bannaan Xukuumadda, sidaa darteed waa inuu noqdaa Gole Dastuuri ah, isla markaana Miisaaniyaddiisu ay soo maro Baarlamaanka. Haddii kale Goluhu ma noqon doono mid ka maran danaha is-diiddan (Conflict of Interests) sida ku cad Faqradda (J) ee isla Qodobkan.

**Soo jeedin #3: Faqradda (14.6)** oo sheegeysa in "*Golaha waqtigiisu uu noqonayo saddex (3) sano oo loo cusbooneysiin karo hal mar oo kaliya haddii loo baahdo*". Waxaan soo jeedineynaa in laga daayo cusbooneysiinta loo sameynayo xil-heynta Golaha, lagana dhigo maamulkasta in muddo hal-xileed kaliya xilka hayo.

#### **QODOBKA 15AAD: MASUULIYADDA GOLAHA:**

Faqradda (15.1) oo u qoran sidan "*Ilaalinta anshaxa Wariyeyaasha ka shaqeeya Warbaahinta iyo ku dhaqanka xeerka Warbaahinta Soomaaliyeed*"

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga dhigo sidan "Wax barista wariyeyaasha Soomaaliyeed iyo ku dhaqanka xeerka Warbaahinta Soomaaliyeed"

**Faqradda 15.3:** oo sheegeysa *“Dhexdhexaadinta iyo xallinta gefafka laga tabanayo Warbaahinta Dowladda iyo tan gaarka ah, marka laga reebo wixii fal-dembiyeed ah”*

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga daayo ereyga “fal dembiyeed”. Waayo khilaafaadka ka dhasha hannaanka war-tebinta ee Warbaahinta marna ma noqon karto fal-dembiyeed. Faqraddan waxay kaloo si cad uga hor imaaneyso **Qodobadda 18aad** iyo **32aad** ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Soo jeedin: Faqradda (15.6):** oo sheegaya ereyga *“fal dembiyeed”*. Waxaan soo jeedineynaa in laga saaro ereyga “fal dembiyeed”. Waayo saxaafaddu dembi ma’ahan.

**Soo jeedin: Faqradda 15.7:** oo sheegaya in Golaha “diyaarinta iyo u gudbinta Wasaaradda miisaaniyadda Golaha”. Waxaan soo jeedineynaa in Goluhu ka madax-bannaanaado Wasaaradda iyo Xukuumadda, uuna ahaado Gole Dastuuri ah oo la xisaabtan u hoostaga Baarlamaanka Federaalka.

#### **QODOBKA 16AAD: Diiwaan-gelinta:**

Faqradda 16.1 oo sheegeysa in *“Warbaahin kasta ay iska diiwaangelinayaan Wasaaradda Warfaafinta Heer Federaal, Heer Dowlad Goboleed iyo Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed.”*

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in Warbaahinta iska diiwaan-geliso Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed oo kaliya maadaama uu noqonayo kan iska leh waajibaadka diiwaan-gelinta Warbaahinta, **Dalkuna uu yahay mid**. Isla Faqraddan, waxaan soo jeedineynaa in Warbaahintii hore u diiwaan-gashaneyd dukumintigooda loo soo wareejiyo Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed aana lagu qasbin diiwaan-gelin cusub.

#### **QODOBKA 18AAD: Diiwaanka Wariyayaasha:**

Faqradda (18.1) oo sheegaya *“Qofkasta oo ku shaqaynaya xirfad wariye waxaa lagu qorayaa Diiwaanka Wariyayaasha kadib marka la hubiyo xirfadiisa wariye-nimo isla markaana Goluhuna u soo gudbiyo Wasaaradaha Warfaafinta Dalka ka jira si loo siiyo warqadda aqoonsiga wariye-nimo kadib marka uu buuxiyo shuruudaha.”*

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in cidda **diiwaan-gelineysa wariyayaasha ay noqoto Ururada Saxaafadda (National Unions/Associations) oo kaliya**. Ku shaqeysiga xirfadda saxaafadda waa mid furan (open profession).

#### **QODOBKA 19AAD: Milkiyadda, Maamulka iyo Mas’uuliyadda:**

Faqradda (19.3) oo u qoran sidan *“Codsiga waxaa kaloo lagu muujinayaa magaca, aqoonta iyo cinwaanka maamulaha.”*

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in meesha laga saaro shuruuddan ah “aqoonta” maamulaha, waayo maamulaha xarun Warbaahin waa shaqo-bixiye ee ma’ahan kii la shaqaaleysiinaayey.

#### **QODOBKA 20AAD: Xilliga Rukhsad-bixinta:**

**Faqradda (20.1) iyo (20.2)** oo tilmaameysa habka rukhsadda.

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga fogaado wax kasta iyo sabab kasta oo keeni karta in shuruud lagu xiro ama rukhsad diiwaan-gelin loogu diido xarun warbaahin.

#### **QODOBKA 22AAD: Waayidda Rukhsadda Diiwaan-gelinta:**

Faqradda (22.1) iyo (22.2) oo ka hadleysa waxyaabaha lagu weyn karo rukhsadda.

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in laga daayo in muddo cayiman lagu xiro hawlgelinta warbaahin iyo waayidda rukhsadda. Sidoo kale waa inaysan waayidda ruksadda sabab u noqon hawl ka dhalatay sida loogu dhaqmayo Xeerkan.

#### **QODOBKA 25AAD: Anshaxa Saxaafadda: Faqradda (25.1) iyo (25.2)**

**Soo jeedin:** Hab dhaqanka Anshaxa Saxafiyiinta wuxuu u furan yahay inay sameystaan ururada wariyayaasha, iyadoo si guudna Golaha Saxaafadda Soomaaliyeed ay kala shaqeynayaan dejinta mid guud oo wariyayaashoo dhan ah. Sidaa darteed waxaan soo jeedineynaa in qodobkan laga beddelo sida uu hadda yahay.

#### **QODOBKA 26AAD: Warbaahin aan Sharciyaysneyn: Faqradda (26.1)**

**Soo jeedin:** Ma cadda waxa loola jeedo “warbaahin” oo aan la qeexin, sidaa darteed waxaan soo jeedineynaa in la qeexo.

#### **Qodobka 27aad: Wax-ka-beddel Sharci-darro ah: Faqradda (27.1)**

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in faqraddan laga tiro Xeerka maadaama ay ka dhalaneyso in mulkiilayaasha iyo maamulayaasha warbaahinta aysan xaq u yeelan inay horumariyaan, quxiyaan wax cusub ku kordhiyaan warbaahintooda siiba Wargeysyada.

#### **Qodobka 28aad: Rukhsad Been-Abuur ah: Faqradda (28.1) iyo (28.2)**

**Soo jeedin:** Waxaan caddeyn waxa loola jeedo “Rukhsad been abuur ah” sidaa darteed waxaan soo jeedineynaa in la qeexo ama laga saaro qodobkan Xeerka.



### **QODOBKA 29AAD (J): Faafin Xog Been ah: Faqradda (29.1)**

**Soo jeedin #1:** Waxaan soo jeedineynaa in faqradda (29.1) ee Qodobka 29aad laga saaro Xeerka, maadaama ay keeneysa faafreeb toos ah oo lagula kacayo warbaahinta. Sidoo Faqradda (J) ee isla Qodobka 29aad (19.1) waxaan ku talineynaa in Qaadista Cabashooyinka laga Keeno Saxaafadda ay noqoto mid xal-doon ah oo aysan ciqaab noqon.

**Soo jeedin #2:** Waxaan kaloo soo jeedineynaa in habka qaadista cabashooyinka Muwaadinka, qoyska ama hay'adda cabashada qabta ay cabashadeeda u gudbin karto Golaha Saxaafadda Soomaaliyeed iyagoo soo raacinaya caddeymo muujinaya qoraalka, codka ama muuqaalka laga cabanayo muddo aan ka yareyn lix bilood gudahood markii la faafiyay qormada laga cabanaayo. Goluhu wuxuu markaa kaddib muddo 14 maalmood aan ka yareyn ku ogeysiinayaa maamulka warbaahinta, tifaftiraha ama wariyaha laga cabanaayo si uu u keeno/u keento jawaab. Goluhu markuu darso kaddib ayuu go'aan ka gaaraya habka xallinta cabashadan.

**Soo jeedin #3:** Waxaan soo jeedineynaa in lagu daro Faqrad kale oo sheegeysa in **“habka xallinta dacwadaha laga keeno warbaahinta iyo wariyeyaasha ay tahay mid gaar ah (confidential and private) oo ay kaliya goobjoog ka yihiin Golaha, dhinaca cabashada keenay iyo dhinaca laga soo cawday”**.

**Soo jeedin #4:** Waxaan soo jeedineynaa in lagu daro Faqrad kale oo sheegeysa in **“habka qaadista iyo xallinta cabashooyinka laga keeno warbaahinta iyo wariyeyaasha ay tahay mid lacag la'aan (bilaash) ah**.

**Soo jeedin #5:** Waxaan kaloo soo jeedineynaa in la caddeeyo hannaanka xallinta iyo qaadista cabashooyinka laga keeno saxaafadda oo ay ka mid noqon karaan: dhex-dhexaadin (mediation); bixin raali-gelin iyo sixitaan (apology and correction).

### **Qodobka 30aad: Magdhaw: Faqradda (30.1)**

**Soo jeedin:** Waxaan walaac aad u weyn ka qabnaa ereyga **“magdhaw”** anagoo u aragna inaan baahi loo qabin, kuna talieyna in laga saaro qodobkan gebi ahaantiisa Xeerka.

**QODOBKA 31AAD (1): Faafin Khasab ah: Faqradda (31.1):** oo sheegaya **“Hay'adda Warbaahineed ee lagu helo arrimaha ku xusan qodobka 29aad ee Xeerkan, laguna qaado xukun ganaax ah ama magdhaw la siiyo ciddii loo gafay, waxaa waajib ku ah in ay faafiso ama baahiso xukunka lagu qaaday, haddii ay ka baaqsato fullinta arrinkan, Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed ama Wasaaradaha Warfaafinta waxay ku ganaaxi karaan, kasokow, magdhawgii lagu xukumay ganaax lacageed oo Xeer gaar ah lagu soo saari doono.”**

**Soo jeedin #1:** Waxaan soo jeedineynaa in qodobkan meesha laga saaro oraahyada sheegaya “ganaaxa” iyo “Wasaaradaha Warfaafinta” maadaama uu ka hor imaanayo Qodobada 14aad iyo 29aad oo cadeynaya in Golaha Saxaafadda Soomaaliyeed kaliya ay tahay cidda iska leh arrimaha uu ka hadlayo Qodobka 31aad.

**Soo jeedin #2:** Waxaan soo jeedineynaa in dib u qoris lagu sameeyo oo laga dhigo “*Golaha Warbaahinta Soomaaliyeed, kaddib marka uu go’aan ka gaaro cabashada laga keenay warbaahin ama wariye wuxuu ka dalban karaa tifaftiraha ama maamulka hay’ad warbaahineed inay daabacdo ama faafiso go’aanka Goluhu ka gaaray cabashada. Tifaftiraha xarunta warbaahinta iyo maamulkeeda ma diidi karaan fulinta daabicidda iyo baahinta go’aanka Goluhu kasoo saaray cabashada.*”

#### **QODOBKA 36AAD: Waajibka Suxufiga iyo Hay'addaha Saxaafadda:**

Faqrada (36.1) iyo (36.8) oo ka hadlaya waajibka suxufiga.

**Soo jeedin #1:** Waxaan so jeedineynaa in Faqrada (36.1) laga saaro Xeerka, iyadoo sababtu tahay (1) waajibaadka wariyaha ay tahay arrin ku cad Xeerka Anshaxa Saxaafadda iyo (2) iyadoo ay ku jiraan ereyo aan caddeyn una baahan kara sharraxaad dheeraad ah.

**Soo jeedin #2:** Waxaan soo jeedineynaa in faqraddan (36.8) laga tiro Xeerka, waayo waxay ka hor imaanaysaa Qodobka 32aad ee Dastuurka Federaalka oo baneynaya Xaqa Helista Xogta.

#### **QODOBKA 37AAD: Xuquuqda Suxufiga:**

Faqradda 37.5(X) oo sheegeysa in “*suxufiga laga rabo inuu ku qoran yahay Diiwaanka Dowladda*”:

**Soo jeedin #1:** Waxaan soo jeedineynaa in faqraddan laga saaro Xeerka maadaama aan soo jeedinay cidda diiwaan-gelineysa suxufiyiinta ay tahay Ururrada Suxufiyiinta ay leeyihiin.

**Soo jeedin #2:** Sidoo kale waxaan soo jeedineynaa in Faqrad dheeri ah lagu daro oo damaanad qaadeysa in mulkiilayaasha warbaahinta waajib ka saaran yahay ilaalinta bed-qabka shaqaalahooda marka ay ku jiraan shaqada iyo inaan wariyeyaasha lagu qasbi karin in loo diro hawl gal shaqo oo halis ay ku jirto.

#### **QODOBKA 35AAD: Suxufi:**

##### **Faqradda (35.1) oo shuruud ku xireysa gelitaanka xirfadda**

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in faqraddan laga saaro Xeerka, loona oggolaado in soo gelitaanka xirfadda iyo ku shaqeysigooduba ay yihiin mid furan (open profession).

#### **QODOBKA 39AAD: Dhawrista Xeerkan:**

**Faqradda (39.1)** “*Cabashooyinka la xiriira warbaahinta waxaa iska kaashanaya xallintooda Wasaaradda Warfaafinta iyo Guddiga Saxaafadda Soomaaliyeed, Ururrada Saxaafadda Soomaaliyeed, haddii ay cidda ay khuseysa ku qanci weydo waxaa la horgeyn karaa maxkamadda awoodda u leh*”.





**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in cabashooyinka warbaahinta laga keeno qaadisteeda ay yeeshaan Golaha Warbaahinta oo la fariisanaya dhinaca laga cawday iyo dhinaca soo cawday.

**Qodobka 40aad: Kaalinta Wasiirka ee Hirgelinta Xeerkan: Faqrada (B, T, J, X, KH, D, R, S, SH)** oo siinaya Wasiirka iyo Wasaaradaha awoodaha ganaaxista warbaahinta iyo saxafiyiinta, wax ka beddelka Golaha Warbaahinta iyo diiwaangelinta wariyeyaasha.

**Soo jeedin:** Waxaan soo jeedineynaa in qodobkan laga saaro Xeerka maadaama Diiwaanka Wariyeyaasha iyo Golaha Saxaafadda Soomaaliyeed aan ku talineyno inaysan ka mid ahan kuwa hoostaga Wasaaradaha Warfaafinta.

--DHAMMAAD--